



it's an **interesting** world

Digniin laga bixiyay abaartii ugu xumeyd ee taariikhda Soomaaliya soo marta wixii ka dambeeyay sanadihii todobaatameeyada

Inta badan gobolada dalka Soomaaliya oo labadii saddexdii sano ee u dambeysay aanay ka da'in roobab ku filan, ayaa waxaa sii kordhaya maalinba maalinta ka dambeysa saameynta ay abaarahaasi ku yeelaneyso dadka iyo duunyada ku dhaqan guud ahaan gobolada dalka, iyadoo xaaladaha ka jira gobolada dalkana ay ka sara mareen haatan in la kormeero goboladaasi, la tirakoobo iwm, kaddib markii abaaraha ka jira gobolada ay ku dhammaadeen 90% xoolihii ay dadku dhaqanayeen, xaaladuna iminka eegeyso inay dadku u geeriyoodaan macluul iyo cuduro ka dhashay biyaha aan nadiifka ahayn iyo waliba biyo la'aan ka jirta gobollo dhowr ah.

Gobolada K/Soomaaliya oo uu ka taliyo ururka Al-Shabaab dadka degan ayaa iminka laga deyrinayaa xaaladooda nololeed, kaddib markii dadkaasi ay ka hor istaageen badarkii ay ku noolaan lahaayeen iyo calafkii la siinayay, taasi oo sababtay inay geeriyoodaan inta badan xoolihii ay dhaqanayeen isla markaasina isaga barakacay kumanaan qoys oo dhinaca Muqdisho gaar ahaan xaafadaha ay dowladdu maamusho ku daadsan si ay u helaan wax ay ku noolaadaan.

Saameynta ay abaaraha ka jira gobolada dalka ku yeelaneyso dadka iyo xoolaha ku nool, gaar ahaan goobaha ururka Al-Shabaab uu maamulo oo Hay'adaha samafalka iyo kuwa gargaarka ka mamnuucay inay ka howlgalaan degaanada ay Shabaabku maamulaan, sida ay horay u sheegeen madaxda iyo saraakiishooda, mana muuqato dadaallo ay Shabaabka qudhooda ugu jiraan sidii ay u badbaadin lahaayeen noloshada dadka ku nool gobolada ay ka taliyaan, iyadoo xitaa dadka rayidka ah u diiday inay waddooyinka isugu soo baxaan Alla bari roob-doonaan ah.

Msiibada kale soo wajahday dadka reer miyiga ah ee degan meelaha ay Shabaabku maamulaan ayaa waxay tahay in had iyo goor maleeshiyaadka Al-Shabaab aanay ahayn kuwo dadka taagta daran u dhimrinayaan, iska daa inay ka qafiifiyaan xilligan awaamiirtooda hareer martay shareecada Islaamka xitaa dadkii ay u diideen inay cueystaan, isku kaalmeen isku ixsaan falaan midkooda wax heysta uu midka kale ku gargaaro.

Dhaqanka xun ee ka daran gumeysigii dalka ku soo duulay oo maleeshiyada ka qalin daartay diktatooriyada iyo cadaadiska dadka liita ee ku nool degaanada ay maamulaan ayaa ka dhigan masiibo kale oo lagu salliday dadka, dalka iyo diinta.

Shacabka Soomaaliyeed ee 100% Muslimka ah heystana mad-habta Shaaficiyada waxaa kale oo jira dhaqan u gaar ah caalamka intiisa badanna ay ku yaqaanaan in qofka Soomaaliga ah uu gargaaro walaalkiisa iyo xitaa qofka aan Soomaaliga ahayn, isla markaasina uu ku tabaruco wixii uu ka roon yahay.

Koox diimeedka Al-Shabaab ee ururka Al-Qaacida uga wakiil ah dalka Soomaaliya tan iyo markii ay sida xoogga ah ku qabsadeen inta badan gobolada K/Soomaaliya waxay bilaabeen dhaqdhaqaaqyo ay dhalan rogayaan dhaqanka soo jireenka ah ee Soomaalidu caanka ku ahayd, iyadoo la wareegay dhammaanba goobaha waxbarashada sida Iskuulada, Dugsiyada, xarumaha cilmiga Islaamka iyo Masaajidda lagu cibaadeysto.

Oday 85-sano jir ah oo ku nool magaalada Muqdisho isla markaasina u soo joogay isbedelada dalka ka dhacayay tan iyo markii uu wax gartay, wuxuuna odaygaasi digniin ka bixiyay xaaladda wadanka uu marayo maanta, oo uu sheegay in abaaraha ka jira gobolada dalka ay noqon doonaan kuwii ugu xumaa ee soo mara taariikhda Soomaaliya.

"Abaartii dabadheer ee dalka ka dhacday sanadihii toddobaatameeyada mid xun ayay maanta ku sugan yihiin dadka iyo duunyada ku dhaqan gobolada dalka" ayuu yiri odaygaasi 85-jirka ah oo sheegay in xilligaasi abaartu ka jirtay oo kaliya gobolada Waqooyi, balse gobolada Koofureed ay aaran ahaayeen, wuxuuna sheegay in maanta gobolada dalka oo dhan ay ka jiraan abaaraha iyo masiibada Al-Shabaab ku heyso dalka, in Alle SWT uu ka soo gaaro maahee si kale aan looga bixi karin.